

Soo koobida

Sharciga Senate-ka 1534 ayaa tababar uga baahan shaqaalaha daryeelka guriga iyo taageerada shakhsiyeed oo dhan iyo sidoo kale shaqaalaha daryeelka gaar ahaaneed iyo qiimeyn loogu talagalay shaqaalaha cusub. Shuruudaha la iskaga baahan yahay ayaa dhaqan galaya Sibtambar 1, 2021. Nidaamyada la raacayo waxaa loogu talagalay shaqaalaha si loo xaqiijiyo in ay leeyihiin xirfadaha, aqoonta iyo kartida adeegyo iyo taageerooyin tayo leh ku siiyaan dadka hela adeegyada guriga-dhexdiisa ee Medicaid ama Mashaariicda Madaxa bannaan ee Oregon.

Mawduucyada laga hadlayo

- Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon, Maamulka Caafimaadka Oregon, SEIU 503, iyo Tababarka ee Carewell SEIU 503 ayaa fulinaya SB 1534.
- SB 1534 ayaa tababar uga baahan shaqaalaha daryeelka guriga iyo taageerada shakhsiyeed iyo sidoo kale shaqaalaha daryeelka gaar ahaaneed ee caawiya dadka qaba naafnimada si ay si badbaado iyo madax bannaani leh ugu noolaadaan guryahooda iyo bulshooyinkooda dhexdiisa. Waxay sidoo kale u baahan tahay qiimeyn loogu talagalay shaqaalaha cusub.
- Shuruudaha cusub ee tababarku ma khuseeyaan shaqaalaha ruqsada u haysta ee ka tirsan hay'adaha daryeelka guriga-dhexdiisa, hay'adaha daryeelka bixiya, guryaha koox ahaanta loo degan yahay iyo goobta daryeelka muddada fog.
- Tababarka la iskaga baahan yahay waxaa loogu talagalay in shaqaalaha laga taageero qabashada shaqooyinkooda. Waxay bixisaa qaabab lagu horumariyo xirfadda iyada oo macluumaadka lala wadaagayo shaqaalaha. Tababarku waa mid lacag la'aan u ah dadka hadda u shaqeeya shaqaalaha daryeelka guriga iyo taageerada shakhsiyeed ahaan, iyo sidoo kale shaqaalaha daryeelka gaar ahaaneed. Shuruudaha tababarku waa sida soo socota:
 - Tababarka isqoritaanka hore (4 saacadood)



- Tababarka muhiimka ah oo loogu talagalay shaqaalaha cusub (8 saacadood)
- Tababarka dib u cusboonaysiinta macluumaadka ah oo loogu talagalay shaqaalaha hadda jira (12 saacadood), iyo
- Sii wadashada waxbarashada ah oo loogu talagalay shaqaalaha oo dhan (12 saacadood 24 sano ee kasta)
- Tababarku wuxuu shaqaalaha ka caawiyaa bixinta adeegyo tayo leh, in ay ku sii nagaadaan xirfadahooda, wuxuu horseedaa ku qanacsanaanta shaqada, wuxuuna wanaajiyaa ammaanka.
- Shaqaalaha daryeelka guriga iyo taageerada shakhsiyeed iyo shaqaalaha daryeelka gaar ahaaneed waxay macluumaad ku saabsan shuruudaha Sharciga Senate-ka 1534 heli doonaan 2020, si ay isku diyaariyaan oo u ogaadaan waxa la filayo 2021.
- Mawduucyada tababarka waxaa ka mid ah:
 - Tallaabooyinka dhanka ammaanka iyo xaaladda degdega ah
 - Fahamka shuruudaha loogu talagalay daryeel bixiyayaasha dhaqaalahooda lagu bixiyay lacagta Medicaid
 - Bixinta adeegyada qofka ku saleysan
 - Fahamka sida loo taageero baahiyaha jireed iyo dareen ee dadka hela adeegyo iyo taageerooyin
 - Maareynta daawooyinka, iyo
 - Bixinta daryeelka shakhsi ahaaneed iyo ka caawinta hawlaha nolol maalmeedka la xiriira.
- Tababarku wuxuu ka koobnaan doonaa isku darka koorsooyinka tababarka dhanka internet-ka iyo aqoon isweydaarsiyo muuqaal iyo maqal ah iyo mid shaqsi ah. Tababarka ee Carewell SEIU 503 ayaa bixiya tababarka.
- Qiimeyntu waxay qiyaastaa waxa uu shaqaaluhu bartay; haddii uu u isticmaali karo shaqada uu qabto.



- Tababarka tijaabada ah waxaa heli doona gobolka oo dhan. Kuwa ka qayb qaataa waxay heli doonaan aqoonsiga dhanka tababarka ah marka tababarada la iskaga baahdo Sibtambar 2021-ka.
- Bogga internet-ka ee SB 1534 ee ku yaala website-ka Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon ayaa bixiya macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan biilka oo ay ku jiraan wakhtiga loo qabtay oo la soo dejisan karo iyo Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo.
- Macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan Tababarka Carewell SEIU 503 ayaa ku yaala website-kooda <https://www.carewellseiu503.org/training>

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon kala xiriir 877-624-6080. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.